

# My Career Insights

Hagitaan xirfad shaqo oo ku habboon ilmahaaga

## Oggolaanshaha ka qaybgalka

Waaxda Waxbarashadu waxay qandaraas kula gashay Australian Centre for Career Education (ACCE – Xarunta Waxbarashada Xirfadda ee Australia) inay siiso helitaanka barnaamijka Aragtida Xirfadayda dhammaan ardayda sannadka 9-aad ee dugsiyada dawladda.

### My Career Insights ayaa caawin doonta ilmahaaga:

- Baro xirfadaha iyo kartida ay u keeni karaan xirfad shaqo.
- Wax ka ogow waxyaabaha ku saabsan shaqooyinka ku habboon awooddooda, xiisahooda iyo shakhsiyadooda, iyo maaddooyinka ay ugu baahan yihiin shaqooyinkaas.

### Iyada oo qayb ka ah barnaamijka My Career Insights, ilmahaagu waxa uu:

- Dhameystiri doonaa su'aalo online ah oo taxane ah bogga Morrisby ee dugsiga (ama guriga haddii aan lagu dhammayn karin dugsiga).
- Heli doonaa Warbixinta barofaaylka Morrisby oo tusinaysa natiijooyinka su'aalaha, kuwaas oo soo koobaya waxa ay ku wanaagsan yihiin iyo danaha shakhsi ahaaneed iyo wixii markaas lasoo jeediyo ee la xiriira waddooyinka xirfadeed iyo fursadaha waxbarasho.
- La kulan 30-daqiiqo khabiir xirfadle ah oo Morrisby u tababaran, kaasoo u sharxi doona ilmahaaga warbixinta. Waad ku biiri kartaa kulankaan. Fadlan u sheeg dugsiga haddii aad u baahan tahay adeeg turjubaan oo taleefanka lasoo galinayo.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan barnaamijka waxaad ka heli kartaa:  
[vic.gov.au/my-career-insights](https://vic.gov.au/my-career-insights)



### Macluumaad baraayfasiga ah oo muhiim ah:

Dhammaan macluumaadka ardayga ee ay aruuriso ACCE (ama lammaanhooda, Career Analysts Pty Ltd) waxaa loo maamuli doonaa si waafaqsan Sharciga Ilaalinta Xogta iyo Gaarka ah 2014 (Vic), Xeerka Diiwaannada Caafimaadka 2001 (Vic), Xeerka Diiwaangelinta Dadweynaha 1973 (Vic), Xeerka Qarsoodiga Australia iyo Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (EU) 2016/679).

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka ay Wasaaradda Waxbarashadu u ururiso ayna u maamusho macluumaadka shakhsiyeed, oo ay ku jiraan gelitaanka, sixitaanka iyo cobashooyinka, tag: Shuruucda baraayfasiga ee dugsiyada [education.vic.gov.au](https://education.vic.gov.au)

ACCE waxay ku kaydisaa xogta ilmahaaga aaladaha jireed ama adeegyada daruuraha. Kuwaani waxay ku yaalaan gudaha Australia Deegaanada Koonfur-Bari ama Aagga Dhaqaalaha Yurub.

Macluumaadka la aqoonsaday waxay noqon doonaan kuwo ay heli karaan shaqaalaha waaxda cilmi baarista iyo ujeedooyinka qorshaynta.

Ardaydu waxay macluumaadkooda ka heli karaan websaydka barofaaylka Morrisby (<https://app.morrisby.com/>) iyadoo la isticmaalayo tafaasiisha galitaanka. Ardaydu waxay xaq u leeyihiin inay raadsadaan sidii ay ku heli lahaayeen, ama ku sixi lahaayeen xogtooda gaarka ah. Ardaydu waxay codsan karaan marin u helka iyo sixitaanka macluumaadkooda iyagoo la xiriiraya [support@ceav.vic.edu.au](mailto:support@ceav.vic.edu.au)

**Sida hoos ku geexan, waxa jira saddex xulashooyin oo laga kala dooran karo. Xulashadaadu waxay saamayn doontaa isticmaalka Morrisby ee ilmahaaga:**

### Xulashada 1: Soogelida

<b>Waxaan bixinayaa oggolaanshahayga:</b> (magaca ilmaha)			
si loo dhamaystiro barofaylka Morrisby iyo kulanka dabagalka. Haddii aad saxiixdo, waxaad ogolaatay inaad akhriday Foomka Oggolaanshaha oo aad ogolaatay in la ururiyo macluumaadka shakhsi ahaaneed iyo caafimaadka ilmahaaga. Tan waxa ku jiri kara macluumaadka la xidhiidha heerka naafanimada ilmahaaga ama arrimo kale oo saamayn kara awooda ubadkaaga si uu u dhamaystiro barofaayl buuxa.			
<b>Magaca Waalidka/Masuulka oo dhameystiran:</b>			
<b>Saxiixa Waalidka/Masuulka:</b>		<b>Taariikhda:</b>	/ /
<b>fasalka ardayga (haddii la yaqaan):</b>			

### Xulashada 2: Wax jawaab ah ma leh

Haddii aanaan jawaab kaa helin, ilmahaagu waxa uu heli doonaa xirfadaha shaqada Morrisby oo keliya. Morrisby Careers waa nooc si heer sare ah wax looga beddelay oo ah Xogta Morrisby oo dhammaystiran oo ka codsaneysa ilmahaaga inay tixgeliyaan waxa ay xiiseeyaan, dookhooda iyo qaabka shaqada. Waxay waydiin doontaa ilmahaaga inuu bixiyo magacooda oo dhameystiran, ciwaanka iimaylka, taariikhda dhalashada iyo magaca dugsiga. Ma jirto xog caafimaad, sida heerka iinta, oo la ururin doono. Markuu ilmahaagu dhammeeyo wuxuu heli doonaa dhammaan agabka xirfadaha shaqada iyo maadada iyo soo jeedinta iyo sidoo kale kulanka lacag la'aanta ah ee lala yeesho lataliye xirfadeed oo aqoon leh. Tani waxay kaa caawin doontaa in aad ogaysiiso barnaamijyada waxbarashada xirfadda dugsiga ee ilmahaaga iyo qorshe hawleedka xirfadaha shaqada. Si kastaba ha ahaatee, noocaan la bedelay ma awoodi doono inuu qiimeeyo kartida ilmahaaga, taas oo faa'iido u yeelan doonta in aad si faahfaahsan u fahamto awoodaha iyo kartida ilmahaaga.

Xog-ururin buuxda, oo ay ku jiraan su'aalaha la xiriira kartida, ayaa loo heli doonaa ilmahaaga marka ay galaan 18, ama marka oggolaanshaha waalidka la bixiyo.

### Xulashada 3: Ka bixid

<b>MA BIXINAYO oggolaanshahayga:</b> (magaca ilmaha)			
si loo dhamaystiro barofaylka Morrisby iyo kulanka dabagalka.			
<b>Magaca Waalidka/Masuulka oo dhameystiran:</b>			
<b>Saxiixa Waalidka/Masuulka:</b>		<b>Taariikhda:</b>	/ /
Haddii aad doorato Xulashada 3, ilmahaagu gelitaanka Morrisby uma noqon doonto mid lacag la'aan ah. Haddii gelitaanka la codsado mustaqbalka, waxay noqon doontaa kharash buuxa.			

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Morrisby booqo: [morrisby.com/morrisby-profile](http://morrisby.com/morrisby-profile)